

## Gargaarka Dhaqaale ee Allina Health

Waa u muhiim Allina Health inay bixiso helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caafimaad ahaan lagama-maarmaanka ah si kasta ha ahaato awooddaada bixinta kharashka. Barnaamijka Daryeelka ee Allina Health Care ayaa la heli karaa si lagaaga caawiyo inaad bixisid kharashkaaga cisbitaalka ama xarunta caafimaadka.

### **Barnaamijka Daryeelka Allina Partners Care**

Barnaamijka Daryeelka Allina Partners Care wuxu u furan yahay bukaanka ku nool gudaha aagga ay ka adeegto Allina Health gudaha Minnesota iyo Wisconsin. Waa in dakhligaaga sannadkii uu yahay ama ka hooseeyo boqolkiiba 275 heerka fakhriga ee federalka. Xadka maal ah kaash ama noqon karaa kaash waa \$20,000.

Haddii ay kuu banaan tahay, Allina Health waxay tirtiri doontaa baaqigaaga ka hadhsan adeegyada caafimaad ahaan lagama-maarmaanka ah. Adeegyada aanay Allina Health soo **dalacin** kharashkooda ma dabbirayo barnaamijkani ama kuma jiraan.

### **Sida loo codsado**

Codsiga waxa lagugu weydiinayaa: tirada qoyska, shaqo, dakhli, maal, xisaabo bangi, iyo dabbiridda caymis ee hadda. Waxa aad u baahan doontaa inaad keentid dukumentiyada taageero ah. Haddii aanad haysan caymis, waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad codsatid Medical Assistance, Minnesota Care/BadgerCare ama aad caymis ka iibsatid suuqa daryeelka caafimaadka (health exchange) ka hor inta aan barnaamijkani kuu banaanaan. Haddii lagu aqbal, waxa uu kuu banaanaan karaa illaa 12 bilood laga bilaabo taariikhda aqballaada.

Si aad u heshid koobiga codsiga iyo haqdhaqanka:

- tag [allinahealth.org/financialassistance](http://allinahealth.org/financialassistance)
- tag cisbitaal ama xarun caafimaad kasta oo ah Allina Health
- qaybtayada Adeegga Macmiilka ka wac 612-262-9000
- codsi qoran boosta ugu soo dir Allina Partners Care, PO Box 43, MR 10200, Minneapolis, MN 55440

Haddii aad u baahan tahay in lagaa gargaaro buuxinta codsiga waxa aad nagala soo xidhiidhi kartaa 612-262-5503. Waxa aanu ku caawin karnaa iyada oo la isticmaalayo teleefonka ama waxa aynu dhigan doonaa ballan kulan oo ah xafiiskayaga shirkadda oo ku yaala 2925 Chicago Ave S, Minneapolis, MN 55407. Waxa kale oo aad wakiiil bukaan kula kulmi kartaa mid kasta oo ka mid ah cisbitaaladayada ama xarumahayaga caafimaadka.

Fadlan codsigaaga aad buuxisay u soo dir Allina Partners Care, PO Box 43, MR 10200, Minneapolis, MN 55440.

Waxa aad tagi kartaa barta ah [allinahealth.org/financialassistance](http://allinahealth.org/financialassistance) ama wici kartaa 612-262-9000 ama 1-800-859-5077 si aad dheeraad u ogaatid. Codsiga Daryeelka Allina Partners Care, habdhaqanka iyo koobitaankan waxa lagu heli karaa afafka ah Ingiriisi, Isbaanish iyo Soomaali.